Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kal.6-aad . kul .11-aad **17/06/2015**

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa 11-aad. Saac.Fur. 11:38gh-Saac. Xir..12:51gd.

Guntinta (Qourum) -141 Xildh

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qu'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Akhrinta 1-aad Hindise sharciyeedka warbaahinta Dalka**
4. **Akhrinta 1-aad Hindise Sharciyeedka Shaqaalaha Ajnabiga**
5. **Qeybinta Hindise Sharciyeedka dhismaha Hay'adaha Maareynta Masiibooyinka**
6. **Qeybinta Hindise Sharciyeedka Xisbiyadda Siyaasadda**
7. **Qaybinta Magacaabis Ku-Xigeen Habdhawre (M.ne Maxamed Cumar Maxamuud)**

1. Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS. Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).

Waxaa shirka Furey Guddoomiyaha Baarlamanka Jamhuuriyadda Federaalak Soomaaliya Mudane ,Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari). Waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir. Kadib, Guddoomiyaha wuxuu codsadey in la ansaxiyo ajendaha Xildhibaanadana way ansaxiyeen..

2. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in ay u yaaliin Ajendayaashaan ka kooban ilaa Todobo Ajendi .

3. Guddoomiyaha wuxuu u ogolaadey in ay hadlaan 3(Seddex Xildhibaan) :-

Xildh. C/llaahi Jaamac, wuxuu soo jeediyey in laga hadlo Mushahaar la'aanta jirta iyo dhibaatada jirta.

Xildh. C/llaahi Goodax Barre, wuxuu sheegay in ay jirto motion ay soo gudbiyeen ilaa 25 Xildh. Wuxuu weydiistey Guddoomiyaha in uu u sheego Meesha Motionkaas uu Maraayo.

Xildh. Maxamed C/llaahi Fadhayo, wuxuu sheegay in ay u yaaliin shuruuc badan oo loo baahanyahay in loo helo waqti.wuxuu intaa ku darey in ay jirto Dhibaato Mushahaar la'aan ay haysato Shaqaalaha iyo Ciidamada.

4. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in maalin loo balamo in laga hadlo arimaha jira iyo Mushahaar la'aanta jirta .

5. Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xildh. Sheekh Shaacir si uu u dhaariyo Xildhibaan Cusub oo la yiraahdo C/llaahi Xuseen Maxamuud uuna bedelay Xildhibaankii geeriyoodey Marxuum . Xuseen Maxamuud Bantuu.

6. Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Wasiir K/Xigeenka Wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha Mudane Cusmaan Libaax Ibraahim, Wasiirka wuxuu akhriyey akhrinta 1-aad ee Hindise sharciy-eedka ee shaqaalaha Ajnabiga ah ama shisheeye.

7. Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in qod.43-aad ,Faq.4-aad Xar. A ee Xeer-hoosaadka Golaha uu sheegayo :-

1. Faah-faahin ku saabsan in uu waafaqsan yahay Sharciga .

2. Caddeyn ku saabsan saameynta ay ku leedahay Hindise Sharciyeedka ee Mashaakilka ka haysta Shaqaalaha Ajaaniibta shaqadooda ,kama muuqato hindise sharciyeedka aad soo gudbisey xitaa tan Ra'iisul Wasaaraha warqadda kama muuqato.

Tankale,wuxuu intaas ku darey In Miisaaniyadda Sannadka soo socda laga helo caddeymo ku saabsan Lacagta ,wuxuuna amrey in lagu soo daro caddeymahaas .wuxuuna xoghaynta ku amrey in aysan qaban Hindise sharciyeed aan u dhameystirneyn kana muuqan 2-dan Qodob.

8. Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Wasiirka Warfaafinta Mudane Maareeye,wuxuuna akhriy- ey Hindise sharciyeedka Warfaafinta oo 3-maalmood ka hor Golaha Baarlamanka loo qeybiyey Wuxuuna ka hadley marxaladaha ay soo martey warbaahinta.

Sharciga warbaahinta Dalka ,waa sharci la doonayo in lagu dhaqo koox rabta inay faafiso faker sida War ,Suugaan iwm. wuxuu kaloo sheegay in 2006dii uu ku wareejiyey Sharcigaan wasiirka warfaafinta Mudane Cali Jaamac Jangali, shirkaasi waxaa ka soo qeybgaley Kooxaha warbaahinta ,Ururada rayidka ah iyo Hay'adaha caalamiga ,18 ilaa 19 ayaa damaanad qaadey Xuquuqda Fakirka,Dastuurkana wuxuu na farayaa Xornimadda warbaahinta inkastoo ay muhiim tahay in la dhawro Xuquuqda gaarka ah kan dhaqanka iwm.wuxuuna sheegay in ay jiraan warbaahino aad u badan ,**waxaa xamar ku yaala 9-TV.iyo wax ka badan 30-Idaacadood, mana jiro sharci u yaala oo lagu hago warbaahinadaas. Haddi sharci aysan lahayn Idaacadda waxay noqoneynsaa suuq lagu adeegto, waxayna ka hawlgalaan wadanka oo idil. Sharciga wuxuu leeyahay muhiimad dhaqaale ,mid amni iyo Bulsho,sharcigaan wuxuu ka koobanayhay 31 qod. Wuxuuna leeyahay 3-warbaahinood sida Warbaahinta dawladda midda gaarka loo leeyahay iyo wabaahinta Bulshada oo ka hadasha Caafimaadka waxbarashada iwm.**

Wasiirka wuxuu golaha Baarlamanka ka codsadey sharcigaan warbaahinta in laga doodo kadibna loo ansaxiyo si loo helo warbaahino sharci ku dhisan kuna dhaqanta sharciga. wuxuu intaa ku da- rey sharcigaan wixii miisaaniyad ku baxaaya waxaa bixinaaya Wasaaradda warfaafinta .

9. Guddoomiyaha wuxuu Wasiirka weydiiyey in ay jiraan miisaaniyad gaar ah oo ay leeyihiin W/Warfaafin-ta ?

JWB.

Wasiirka wuxuu sheegay Budget oo si gaar ah loogu foondeeyo ma jirto balse ay wasaaradda qabaan kharasha la dhaho Adeega kooban ,kaas ayaa la doonayaa in laga bixiyo .

10. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in qodobka ugu danbeeyey uu akhriyey Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta Mudane Maareeye.

Sharcigii shaqaalaha la akhriyey waxaa lagu sheegay in la baabi'iyey Sharci.

Guddoomiyaha wuxuu weydiiyey Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha Sharciga la baabi'iyey maxay tahay ? Qodobka 6-aad ee Dastuurka ma waafaqsan yahay?

Xildh. Aweys Ibraahim, wuxuu sheegay in uu ka hadlaayo 2-qodob ,

1. Bisha Ramadaan ,Ramadaanul kariim, wuxuu sheegay in ay yihiin wakiiladda Shacabka wuxuu soo jeediyey in shaqaalaha xil layska saaro ayna helaan waxay Ramadaanka ay ku soomaan.

2. Shuruucda waxaa ugu horeeya Dastuurka ,Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka in markasta wax laga bedelo waa muhiim ,waana marjeca bogga ugu danbeeyo oo sax ah ,waa kan ay hiigsanayan Xildh. Baarlamanka ayna waajib tahay in ay heestaan .

11. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu jiro hal Xeer-hoosaad 23 Okt. 2014 ayaa ugu danbeeyey,waa kan hadda lagu shaqeynaayo mid kalana ma jiro.

Xildh. Yuusuf Maxamed Cali,wuxuu sheegay in uu ka hadlaayo arin qof kale ka hadashay aysan jirin,waana waxyaabo la rabo in la saxo , Dawladda deriska nala ah ee Kenya ay derbi ka dhiseyso Xuduudka Soomaaliya iyo Kenya u dhaxeeya ,si dhibaato danbe arintaa iyada ah aysan u keenin caddawtinimo ka dhex dhacda Soomaaliya iyo Kenya loo baahanyahay in ay iska arkaan Dawladda Soomaaliya iyo Dawladda Kenya.

12. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in ay tahay arinta jirta ,Motionkaasna wuxuu ku amrey Xoghaynta in ay qeybiyaan.

Xildh. Cabdalla Boos Axmed, wuxuu sheegay dhacdadii 23 kii May 2015ka Shirqoolkii lagu sameeyey ay aheyd dhacdadii foosha xumeyd ee baabuurkooda lagu rasaaseeyey,ayna saarnaayeen 5 ruux ,kuna dhinteyn 2-ruux waa Xildh. Yuusuf Dirir iyo Askarigii Muqtaar ee waardiyaha ahaa Allaha ha u naxariisto. Falkaan dhacay xitaa waxaa sheegatey Shabaab.Dadka-asi lama qaban ilaa lix maalmood ,markii dhibka ay geesteyn waxay galeyn Madaxtooyadda.

Wuxuu kaloo intaa ku darey ,in la xir -xirey ciidankii Qaranka oo u soo gurmaday oo badbaadiyey Xildh. B/buurkaa saarnaa . 17 - Xildhibaan ayuu sheegay in ay ugu maqanyihii . Sida uu Guddoomiyaha Yiri , Guddoomiyaha ayaan u xilsaarnay.

13.Guddoomiyaha, wuxuu sheegay in uu u xilsaarey 2-guddi oo wada jir ah ,daraad ayuu sheegay in ay heleynwarbixin dhameystiran,kii gaari gacanka watey iyo qof alle qofkii wax ku gaarey in la soo qoro ,welina conclution lama gaarin labadda Guddina hawshooda way wadaan Guddoonka wuxuu sugayaa warbixintaas oo dhameystiran.

Kalfadhiga 6-aad kulankiisa 11 –aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS. Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari). Wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay Saacaddu markey aheyd 12:50gd.